**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
جمهورية صوماليلاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT
مكتب الرئيس

TIX: JSL/XM/GW/081-039/012025 Taar: 18/01/2025

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, Xeer Lr. 89/2024,

Markii aan arkay: Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markii aan arkay: Qoddobka 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markii aan arkay: Qoddobka 38aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markii aan helay: Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiillada (Go'aan Lr; GW/KF-10/29/2024) ee summaddiisu tahay Ref; GW/G/10/376/2024, kuna taariikhaysan 30/12/2024, Xeerka Garyaqaanka Guud ee Somaliland, Xeer Lr. 89/2024;

Waxa aan Soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu faafinayo Dhaqan-galka Xeerka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, Xeer Lr. 89/2024.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RECEIVED House of Representative
RL:04
19/01/2025

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Garyaqaanka Guud ee Somaliland**
**Xeer Lr.89/2024**

**Markuu Arkay:** Qodobka 94aad iyo Qodobka 122 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay:** Qodobka 38aad faqraddiisa 3aad ee xeerka nidaamka garsoorka xeer Lr. 24/2020 oo sheegaysa shaqada Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda.

**Markuu Aqoonsaday**: Muhiimadda ay leedahay in la helo xafiis u gaar ah arrimaha sharciyada ee dawladda iyo laama heeda kala duwan oo ka caawiya soo diyaarinta qabyo qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curiso iyo ka talo bixinta arrimaha sharci ee dawladda iyo ku baahinta xeerarka faafinta rasmiga ah marka la'ansixiyo si'waafaqsan Dastuurka JSL.

**Markuu Xaqiiqsaday**: Inay lagama maarmaan tahay in la dejiyo xeer si cad u qeexa shaqada iyo waajibaadka xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, kaas oo uga masuul noqda adeegyada sharci dawladda iyo laamaheeda kala duwan, isla markaana lagu nidaamiyo qaabdhismeedka, shaqada iyo waajibaadyada xafiiska.

**Markuu Arkay**: Go'aanka Ansixinta Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Garyaqaanka Guud , **Xeer Lr. 89/2019** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **08/12/2019** kalfadhigii **41aad** fadhigiisi **25aad.**

**Markuu Arkay**: In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen konton **(50)** cod Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Garyaqaanka Guud , **Xeer Lr. 89/2024** kuna taariikhaysnaa **22/06/2024**

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah sagaal iyo sodon **(39 cod)** oo gacantaag ah ku Ansixiyay Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Garyaqaanka Guud **Xeer Lr.89/2024**.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Yaasiin X.Maxamuud Xiir (faratoon)
GuddoomiyahaeeGolahaWakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADA

# XEERKA
## GARYAQAANKA GUUD EE XUKUUMADDA
## Xeer Lr. 89/2024

# GOLAHA WAKIILLADU

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 94aad iyo Qodobka 122 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Markuu arkay:** | Qodobka 38aad faqraddiisa 3aad ee xeerka nidaamka garsoorka xeer Lr. 24/2020 oo sheegaysa shaqada Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda. |
| **Markuu aqoonsaday**: | Muhiimadda ay leedahay in la helo xafiis u gaar ah arrimaha sharciyada ee dawladda iyo laama heeda kala duwan oo ka caawiya soo diyaarinta qabyo qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curiso iyo ka talo bixinta arrimaha sharci ee dawladda iyo ku baahinta xeerarka faafinta rasmiga ah marka la'ansixiyo si'waafaqsan Dastuurka JSL. |
| **Markuu xaqiiqsaday**: | Inay lagama maarmaan tahay in la dejiyo xeer si cad u qeexa shaqada iyo waajibaadka xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, kaas oo uga masuul noqda adeegyada sharci dawladda iyo laamaheeda kala duwan, isla markaana lagu nidaamiyo qaabdhismeedka, shaqada iyo waajibaadyada xafiiska. |

## WUXUU ANSIXIYAY:

## XEERKA GARYAQAANKA GUUD EE XUKUUMADDA
## Xeer Lr. 89/2024

GOLAHA WAKILADA
ARKIFIYADA
J.SOMALILAND

## CUTUBKA IAAD

## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa: **Xeerka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, Xeer Lr. 89/2024**

### Qodobka 2aad
### Erey bixinta

Xeerkan gudihiisa, haddii aan si kale nuxur ahaan loogu tilmaamin, ereyada iyo weedhaha hoos ku qoran waxay yeelanayaan macnaha halkan lagu siiyey:

1. **Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda (Chief State Counsel)**: Waxa loola jeedaa qofka loo magacaabo in uu noqdo **Garyaqaaanka Guud ee Xukuumadda** Jamhuuriyadda Somaliland.
2. **Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda:** Waxa loola jeedaa qofka loo magacaabo in uu noqdo ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Xukuumada Jamhuuriyadda Somaliland.
3. **Garyaqaan dawladeed (State Counsel):** Waxa loola jeedaa qof kasta oo ah qareen sharciyaqaan ah oo ka shaqeeyaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda.

4. **Xafiis:** Waxa loola jeedaa Xafiiska **Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda JSL.**

5. **Waax:** Waxa loola jeedaa waax kasta oo ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda oo uu hoggaamiyo Agaasime waaxeed uu magacaabo Garyaqaanka Guud.

6. **Xukuumad:** Waxa loola jeedaa Waaxda Fulinta ee Jamhuuriyadda Somaliland sida uu qeexay qodobka 80aad ee Dastuurku oo ay ku jiraan maamullada gobollada iyo degmooyinku si waafaqsan qodobka 110aad faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Somaliland.

7. **Hay'ad/Laan dawladeed:** Waxa loola jeedaa qaybaha kala duwan ee hay'adaha dawladda sida wasaaradaha, hay'adaha, komishannada, wakaaladaha IWM.
8. **Adeeg:** Waxa loola jeedaa adeegyada ama shaqooyinka uu qabto xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu ee_ku xusan xeerkan.

9. **La talin sharci:** Waxa loola jeedaa adeegga latalinta sharci ee xafiisku siiyo laamaha kale ee dawladda.
10. **Qabyo qoraallada xeerarka:** Waxa loola jeedaa diyaarinta hore ee xeerarka ay xukuumaddu curiso intaanay ansixin golayaasha xeer dajintu.
11. **Xeer:** Waxa loola jeedaa xeerarka ay ansixintooda iska leeyihiin golayaasha xeer dejintu.
12. **Xeerarka dalka:** Waxa loola jeedaa xeerarka Baarlamaanka, digreetooyinka wareegtooyinka, xeer-nidaamiyayaasha iwm.
13. **Faafinta rasmiga ah:** Waxa loola jeedaa daabacaadda rasmiga ah (official gazette) ee xukuumadda awood loogu siiyay inay ku daabacdo, kuna baahiso xeerarka dalka.
14. **Dacwadaha madaniga ah:** Waxa loola jeedaa dacwadaha madaniga ah ee aan ciqaabta ahayn ee hay'adaha dawladdu qayb ka yihiin.
15. **Dacwadaha idaariga ah:** Waxa loola jeedaa dacwadaha maamul ee hay'adaha dawladdu qayb ka yihiin.
16. **Golayaasha xeerdejinta:** Waxa loo la jeedaa Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiillada JSL.
17. **Madaxweynaha:** Waxa loola jeedaa Madaxweynaha JSL.
18. **Dawlada:** Waxa loolaa jeedaa saddexda waaxood ee Qaranku ka kooban yahay (Fulin, xeerdejin, garsoor) sida uu dhigayo 37aad faqraddiisa 2aad.

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeedada xeerkan waa in lagu dhiso xafiis dawli ah oo Dawlada uga masuul noqda adeegyada sharci ee dawlada iyo laameheeda kala duwan u baahan yihiin, si loo buuxiyo baahida adeega sharci ee dawlada isla markaana lagu nidaamiyo qaab-dhismeedka iyo xilka iyo waajibaadyada xafiiskaasi.

# CUTUBKA LABAAD
# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE XUKUUMADDA

## Qodobka 4aad
## Aasaasidda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda

1. **Waxa xeerkan lagu aasaasay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda oo ah xafiis hoos yimaadda xafiiska Madaxweynaha, isla markaana yeelanaya astaan iyo shaambad u gaar ah.**
2. **Xarunta Xafiiska Garyaqaanka Guud waxay noqonaysaa Caasimadda JSL ee Hargeysa, waxaana uu laamo ka furan karaa gobollada dalka, haddii loo baahdo.**

3. **Xafiiska Garyaqaanka Guud waa xafiis hoos yimaadda xafiiska Madaxwaynaha, si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, waxaanu yeelan karaa hanti guurto iyo ma'guurto ah labadaba, waxana uu ku gali karaa magaciisa heshiis kasta, kuna dacwayn karaa ama lagu dacwayn karaa magaciisa.**

## Qodobka 5aad
## Ujeeddooynka aasaasidda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda

Ujeeddada loo aasaasaay Xafiiska **Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu** waa in la helo xafiis dawladeed oo qaabilsan adeegyada sharci ee ay ka mid yihiin:

1. Ka qayb qaadashada ama bilaabidda dacwadaha madaniga ah iyo kuwa idaariga ah ee ka furan maxkamadaha dalka ee ay hay'adaha dawladdu qayb ka yihin.
2. Kala talinta sharci ee dawladda iyo laamaheeda kala duwan si loo xaqiijiyo in tallaabooyinka la qaadayaa ay noqdaan kuwa sharciga waafaqsan.
3. Diyaarinta ama dibu'eegista qabyo-qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curiso ee loo gudbinayo Golaha Wasiirrada (Cabinet)
4. Soo saaridda iyo faafinta xeerarka iyo qoraallada ay tahay in lagu daabaco faafinta si laamaha dawladda iyo dadwaynuhuba u helaan xeerarka dalka ee soo baxa.
5. Ku soo saarista faafinta rasmiga ah xeerarka ama wax ka beddellada xeer, 30 maalmood gudahood, kaddib markuu Madaxweynuhu saxeexo xeerarka ama wax ka beddellada xeer, haddii aan xeerarka ama wax ka beddellada xeer gudahooda lagu cayimin muddo lagu faafiyo xeerarka ama wax ka beddellada xeer oo ka duwan muddada ku xusan faqraddan.

## Qodobka 6aad
## Xil gudashada Xafiiska

1) Xil gudashada Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu marka uu gudanayo waajibaadkiisa ama uu isticmaalayo awoodihiisa xeerkan ku xusan waxa hagaya oo saldhig u ah Shareecadda Islaamka, Dastuurka JSL, xeerkan iyo xeerarka kale JSL.
2) Waxa uu xilkiisa iyo waajibaadkiisa shaqo u gudanayaa si madax bannaan oo waafaqsan xeerkan, xeerka kala xaddaynta awoodaha dawladda iyo xeerarka kale ee dalka.

GOLAHA WAKILADA
ARKIFIYADA
J. SOMALILAND

## Qodobka 7aad
## Shaqada Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda waxa uu qabanayaa shaqooyinkan hoos ku xusan:-

1) Xafiiska Garyaqaanka Guud waa lataliyaha sharci ee dawladda, wuxuu u qaabilsan yahay dhammaan hawlaha la xidhiidha sharciyada.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn shaqada guud ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa uu xafiisku qabanyaa shaqooyinkan soo socda:
   b. In uu ku metelo maxkamadaha hortooda hay'adaha kala duwan ee dawladda dacwadaha madaniga ah ee ku saabsan xeerarka madaniga ah (ay ku jiraan kuwa la xidhiidha shaqada), iyo kuwa idaariga ah (administrative) ee hay'adaha dawladdu ay soo oogaan ama lagu oogo.
   t. In uu ka furto ama ku biiro (intervene) dacwadaha madaniga ah ama idaariga ah maxkamadda awoodaha u leh ee ka qayb galkeedda sharcigu tilmaamayo, rafcaana ka qaata go'aamada ka soo baxa hadduu ku qanci waayo.
   j. In uu ka qayb galo ama bilaabo dacwadaha madaniga ah ama idaariga ah ee loogu oogi karo qof ama shirkad si loo fuliyo heshiis, damaanadqaad (guarantee), rahan, deynka (ay ku jirto bixinta cashuur ama ajuuro aan la'bixin) ee ay ku leedahay hay'ad dawladeed.
   x. In uu ku metelayo Dawlada Jamhuuriyadda Somaliland dacwad kasta oo caalami ah, wada hadallo ama shirar, halkaas oo meeqaamka sharci ee Jamhuuriyadda ay tahay in laga difaaco ama lagu soo bandhigo marka uu helo tilmaanta iyo ogolaanshaha Madaxweynaha.
   kh. In uu diyaariyo qabyo-qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curinayso ee loo gudbinayo golayaasha xeerdejinta (Guurtida iyo Wakiillada), si loo fuliyo masuuliyadda dawladda ee la xidhiidha soo bandhigidda mashruuc sharci ee ku xusan qodobka 74aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JSL.
   d. In uu xaqiijiyo in qabyo-qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curiso, ay noqdaan kuwa loo diyaariyo si habboon oo aan mugdi lahayn, laguna qoro luqad sharci oo la fahmi karo, si loo helo xeerar leh hannaan isku mid ah (unified standard), aan iska hor imanayn (not contradicting), isla markaana waafaqsan Dastuurka iyo xeerka kale ee dalka.

r. In uu ka caawiyo Madaxweynaha iyo hay'adaha kale ee dawladda diyaarinta xeer-nidaamiyayaasha, wareegtooyinka, degreetooyinka iyo qoraallada kale ee sharci, marka ay wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladdu u soo gudbiyaan hindise qoraleedka sharciyadaasi.

s. In uu daraasadeeyo baahida xeerarka dalka, isla markaana diyaariyo qorshe sannadle ah oo dhigaya mudnaanta xeerarka una gudbiyo Madaxweynaha iyo hay'adaha ay khusayso, si loogu saleeya qorshaha miisaaniyad sannadeedka dawladda.

sh. In uu siiyo Madaxweynaha, wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladda adeegga latalinta sharciga (legal services) ee ku saabsan go'aannada iyo awaamiirta, si loo xaqiijiyo in go'aannada iyo tallaabooyinka dawladdu ay noqdaan kuwa sharciga waafaqsan.

dh. In uu ka siiyo talooyin sharci Madaxweynaha, wasiirrada iyo madaxda hay'adaha dawladda habka loo diyaariyo heshiisyada dawladda si loo xaqiijiyo in loo galay ama loo diyaariyey si waafqsan xeerarka la xidhiidha iyo sida ugu wanaagsan danta guud ee Qaranka Somaliland.

c. In uu ka talo bixiyo, marka la soo weydiiyo, arrimaha sharci ee ka dhex dhasha hay'adaha dawladda si loo ilaaliyo ku dhaqanka iyo sarraynta sharciga.

g. In uu kala taliyo dawladda heshiis kasta oo caalami ah (international treaty) oo ay galayso, isla markaana, isaga oo la kaashanaya Madaxweynaha iyo wasaaradaha ay khusayso, uu xaqiijiyo in la qaaday dhammaan tallaabooyinkii daruuriga ahaa ee lagu ansixin lahaa (ratification) heshiis ama mucaahado uu farayo qodobada 53aad faqraddiisa 3aad iyo qodobka 38aad faqraddiisa 6aad xarafka (t) ee Dastuurka, sidoo kalana uu keydiyo nuqullada asalka ah ee heshiisyada la ansixiyay.

f. In uu kusoo saaro faafinta rasmiga ah (Official Gazette) dhammaan xeerarka ay ansixiyaan golayaasha xeerdajintu (Guurtida iyo Wakiillada) kadib marka uu saxeexo Madaxweynuhu si waafaqsan qodobka 75aad Dastuurka JSL.

q. In uu kusoo saaro faafinta rasmiga ah dhammaan xeer-nidaamiyayaasha, digreetooyinka, wareegtooyinka iyo go'aannada maamul ee xeerarka dalku jideeyeen in faafinta rasmiga ah lagu soo saaro.

GOLAHA WAKILADA * ARKIFIYADA * JSL SOMALILAND

k. Inuu soo saaro isla markaana daabaco faafinta billaha ah iyo tan sannadlaha ah, sidoo kalana ku daabaco xeerarka dalka oo xeer walba nuqul u gaar ah leh.

L. Inuu ku wacyi galiyo bulshada xeerarka iyo shuruucda dalka, isagoo adeegsanaya warbaahinta kala duwan ee dalka.

m. Inuu sameeyo xarun lagu keydiyo dhammaan xeerarka dalka, sidoo kalana abuuro mareeg xagga internetka ah (legal service website) oo laga heli karo dhammaan xeerarka dalka, si bulshada Somaliland loo gaadhsiiyo xeerarka dalka.

n. Inuu qabto hawl kasta oo sharciga ku saabsan oo u xilsaaray Xafiiska Garyaqaanka Guud xeerkan ama xeer kale ama Madaxweynuhu.

## CUTUBKA SADDEXAAD

## QAAB-DHISMEEDKA XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE XUKUUMADDA

### Qodobka 8aad
### Qaab-dhismeedka Xafiiska

1) Qaab-dhismeedka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waxa uu ka koobnaanayaa:
    b. Garyaqaanka Guud.
    t. Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud.
    J. Waaxo (departments)
    x. Qaybo (sections) hoostaga waaxaha iyo shaqaale kale.
2) Waaxaha uu xafiisku ka koobnaanayo waxa ka mid ah:
    b. Waaxda diyaarinta qabyo-qoraallada iyo dibu-eegista xeerarka.
    t. Waaxda latalinta sharciga.
    j. Waaxda dacwadaha madaniga iyo idaariga ah.
    x. Waaxda faafinta rasmiga ah.
    kh. Waaxda maamulka iyo maaliyadda
3) Waaxaha ku xussan faqradda 2aad ee qodobkan waa la kordhin karaa waana la yarayn karaa kolba sida shaqada xafiisku tahay.

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMAL

GOLAHA WAKILADA
ARKIFIYADA
J. SOMALILAND

**Qodobka 9aad**
**Magacaabidda iyo Xilka qaadista Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisa**

1. Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda iyo ku-xigeenkiisa waxaa magacaabaya Madaxweynaha JSL.
2. Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda iyo ku-xigeenkiisa waxa xilka ka qaadi kara oo kaliya Madaxweynaha JSL.

**Qodobka 10aad**
**Shuruudaha Magacaabista Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisa**

1. Shuruudaha magacaabista Garyaqaanka ama ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waa:

   B. In uu yahay muwaaddin reer Somaliland ah.

   T. In uu yahay Muslin, asluub & akhlaaq wanaagsan bulshada ku dhex leh.

   J. in uu leeyahay aqoon waxbarasho heer jaamacadeed oo aqoonta sharciga ah, haystana ugu yaraan shahaadada darajada koowaad ee (LLB) oo ah jaamacad la aqoonsanyahay.

   X. In uu leeyahay waaya'aragnimo shaqo oo la'xidhiidha xirfada sharciga sida qareen, garsoore, xeer-ilaaliye ama macalin jaamacadeed oo sharciyada ah ugu yaraan 10 sanno.

   Kh. In da'diisu aanay ka yarayn 35 sanno kana waynayn 60 sanno.

   D. In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ah 5 tii sanno ee ugu danbeeysay.

   R. In uu maskax ahaan iyo jidh ahaanba gudan karo xilka loo igmaday.

   S. In ay ku sifoobaan xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan isla markaana leeyihiin sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

**Qodobka 11aad**
**Shuruudaha Xilka qaadista Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiisa**

1) Garyaqaanka guud iyo ku-xigeenkiisa waxa xilka lagaga qaadi karaa shuruudahan hoos ku xusan:

   B. Marka ay xilka gudan kari waayaan karti darro awgeed fadhiidna ka dhigta hawshii xafiiska.

T. Marka ay ku kacaan anshax xumo, xatooyo, musuqmaasuq IWM.
J. Marka ay iscasilaad qoraal ah u gudbiyaan Madaxweynaha, Madaxweynuhuna ka aqbalo.
X. Marka ay galaan dembi xadhiggiisu gaadhayo muddo sadex (3) sanno ah ama ka badan.
Kh. Marka ay gudan kari waayaan xilkooda sababo caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diwaangashan Wasaarada Caafimaadka.

**Qodobka 12aad**
**Bannaanaanta jagada**

1) Jagooyinka Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenkiiisu waxay ku bannaanaan karaan:
   B. Haddii xilka laga qaado.
   T. Haddii ay is casilaan madaxweynuhuna ka aqbalo.
   J. Haddii ay geeriyi ku timaaddo.
   X. Haddii ay haleesho caafimaad darro aan u saamixi karin gudashada xilka oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiira oo u diiwaan gashan Wasaaradda Caafimaadka.

**Qodobka 13aad**
**Dhaarinta**

1) Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisa waxa la marinayaa dhaarta sharciga ah muddo 30 cisho gudahood ah. Waxaana dhaarin doona Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyada oo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland goob joog yahay.

2) Dhaarta ku xusan faqradda sare ee qodobkan waxay noqonaysaa dhaarta ku xusan qoddobka 129aad ee Dastuurka JSL.

**Qodobka 14aad**
**Darajada Shaqo**

1) Darajo ahaan Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu wuxuu la siman yahay darajada Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka, waxaana uu leeyahay mushahar derejada (A2) iyo gunnooyin la siman oo kuwa Xeer Ilaaliyaha Guud.
2) Ku/xigenka Garyaqaanka Guud wuxuu leeyahay mushahar derejada (A3) iyo gunnooyinka la siman Garyaqaanka Guud.
3) Garyaqaanka Guud iyo ku-xigeenka Garyaqaanka Guud looma oggola inuu qabto shaqo kale inta uu xilka hayo.

### Qodobka 15aad
### Garyaqaannada iyo Shaqaalaha Xafiiska

1) Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waxa uu yeelanayaa shaqaale ka kooban garyaqaanno iyo qareenno (solicitors) oo leh aqoon iyo xirfad sharciyeed iyo shaqaale kale ee looga baahan yahay hirgelinta waajibaadka iyo shaqooyinka xafiiska.
2) Xubnaha garyaqaannada ah ee ka hawl galaya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee aan ku iman magacaabid Madaxweyne, waxay ku imanayaan tartan furan ama dallacsiin qof hore ugu shaqaynayay xafiiska ama ka soo beddelid (transfer) xafiis u dhigma, si waafaqsan habka shaqaalaysiinta ee shaqaalaha dawladda.
3) Garyaqaannada Xafiiska Garayaqaanka Guud waxay yeelan doonaan gunno xirfadeed (professional allowance) la mid ah gunnada ku xigeennada Xeer-ilaaliyaha Guud.
4) Shaqaalaha kale ee Xafiiska Garyaqaanka Guud magcaabiddoodu iyo xaaladahooda shaqo waxa lagu maamulayaa Xeerka Shaqaalaha Dawladda.

### Qodobka16aad
### Khubaro Latalineed

1) Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waxa uu marka loo baahdo, ka hawl-galin karaa xafiiska khubarro latalineed si uu isticmaalo khibraddooda sharci iyada oo xilkooda iyo muddada shaqadoodaba uu go'aaminayo Garyaqaanka Guud, taas oo ku salaysan baahida shaqo ee loo qabo, isagoo latashanaya ku-xigeenkiisa.
2) Khubarada Latalineed ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkani waxa ay ka kaalmaynayaan Garyaqaanka Guud gudashada waajibaadkiisa shaqo ee ku xusan xeerkan.

### Qodobka 17aad
### Xilka iyo Waajibaadka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda

1) Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waxa uu ka masuul yahay hirgelinta shaqada iyo gaadhista ujeeddooyinka xafiiska ee ku xusan qodobka 7aad ee xeerkan.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimeyn xilka iyo waajibaadka guud ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan iyo waajibaad kasta oo kale oo xeer kale dhigayo, xilka iyo shaqada Garyaqaanka Guud ee dawladda waxa ka mid ah:

GOLAHA WAKILADA J. SOMALILAND ARKIFIYADA

B. Waa lataliyaha adeegyada sharci ee dawladda, waxaanu dawladda u qaabilsan yahay dhammaan hawlaha iyo adeegyada sharciga la xidhiidha.

T. Wuxuu ka qayb galaa dacwadaha madaniga ah iyo kuwa idaariga ah ee ka qayb galkeedda xeer tilmaamayo, kana qaadan karo rafcaan haddii uu ku qanci waayo go'aanka.

J. Waxa uu dibu'eegayaa diyaarinta qabyo-qoraallada xeerarka ay xukuumaddu curiso.

X. Wuxuu soo saarayaa isla markaana horumariyaa faafinta rasmiga ah (Official Gazette).

Kh. Wuxuu hoggaamiyaa xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda, kaas oo awood u leh maamulidda iyo kormeerka xafiiska iyo dhammaan waaxaha, qaybaha iyo shaqaalaha xafiiska.

D. Wuxuu socodsiiyaa isla markaana maamulaa dhammaan hawlaha xafiisku u xil saaran yahay ee ku xusan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.

R. Wuxuu qorsheeyaa shaqooyinka xafiiska, si waafaqsan siyaasadda iyo qorshaha dawladda.

S. Wuxuu magcaabaa madaxda waaxaha xafiiska markuu la'tashado Garyaqaan ku-xigeenka, sidoo kalana guddoomiyaa shirarka shaqaalaha xafiiska.

Sh. Wuxuu soo jeediyaa miisaaniyadda xafiiska markuu la'tashado madaxda waaxaha xafiiska.

Dh. Wuxuu saxeexaa heshiisyada iyo qoraallada rasmi ahaan uga soo baxa xafiiska.

C. Wuxuu ka hawl-galaa kor u qaaddida xirfadaha iyo tayada shaqaalaha xafiiska.

G. Wuxuu saxeexaa warbixin sannadeedka iyo xisaab xidhada xafiisku soo diyaariyo.

## Qodobka 18aad
## Xilka iyo Wajibaadka Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud.

1) Xilka iyo waajibaadka ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu waa:-

   B. In uu ka caawiyo Garyaqaanka Guud gudashada waajibaadkiisa.

   T. In uu qabto shaqooyinka Garyaqaanka Guud marka uu maqanyahay.

   J. Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud waxa kale oo uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xil saaro Garyaqaanka Guud ee Xukuumaddu.

**Qodobka 19aad**
**Xasaanadda Garyaqaanka Guud**

**Garyaqaanka Guud iyo Ku-xigeenkiisu waxay leeyihiin xasaanad, la mid ah ta Golaha Wasiirrada ee xukuumadda, lama xidhi karo haddaan lagu qaban iyagoo faraha kula jira denbi ciqaabtiisu gaadhayso ugu yaraan (3) sanno isla markaasna waxa oggolaanaya Madaxweynaha, isagaana ka xayuubin kara xasaanadda.**

**Qodobka 20aad**
**Fal-dambiyeedyada masuuliyiinta Xafiiska Garyaqaanka Guud**

1) Lama xidhi karo Garyaqaanka Guud, Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud iyo garyaqaannada kale haddii aan lagu qaban iyaga oo faraha kula jira denbi ciqaabtiisu qaadhayso ugu yaraan saddex (3) sanno.
2) Marka la qabto garyaqaan ka tirsan xafiiska, isaga oo denbiga ku xusan faqradda koowaad faraha kula jira, waa in la ogaysiiya Garyaqaanka Guud 48 saacadood gudahood.
3) Garyaqaanka Guud waxa uu amri karaa hakinta gudashada waajibaadka xubinta garyaqaanka ah ee la soo dacweeyey iyada oo mushaharku u socdo ama iyada oo aanu u socon inta ay socoto dacwaddu, baadhista dacwadu ama dhegaysigeedu.

**CUTUBKA AFRAAD**

**QODOBBO KALA DUWAN**

**Qodobka 21aad**
**Talo Sharci**

1. **Hay'adaha xukuumaddu waxay kala tashanayaan arrimaha quseeya xafiiska Garyaqaanka Guud**
2. **Talo kasta oo la siiyey hay'ad xukuumadeed oo la'xidhiidha muran sharci oo uu saxeexay Garyaqaanka Guud waa mid nuxurkeeda ay raacayaso.**
3. **Marka uu u arko Garyaqaanka Guud in si toos ah ama si dadban loo baal maray talo sharci oo uu siiyey hay'adaha xukuumadda, waxa uu u gudbinayaa ogaysiinta khatartaas wasiirka ama guddoomiyaha hay'adaas xukuumadeed nuqul ogaysiin ah, waxa uu u gudbinayaa Madaxweynaha.**

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND

4. **Hay'adda xukuumadeed nuqulka uu u soo gudbiyey Garyaqaanka Guud, haddii ay ku qanci waayaan, waxay qoraal sababaysan u gudbinayaan Madaxweynaha.**
5. **Madaxweynaha ayaa go'aan ka gaadhaya murankaas ama u gudbinaya Maxkamadda Dastuuriga ah si ay u tafsiirto.**

**Qodobka 22aad**
**Warbixin Sannadeed**

1) Garyaqaanka Guud waa inuu diyaariyaa warbixin sannadeedka shaqada Xafiiska dhammaadka sannad walba una gudbiyaa Madaxweynaha, warbixintaas oo ku salaysan wixii u qabsoomay, waxa u qorshaysan, tallaabooyinka muhiimka ah ee la'qabatay iyo wixii kale ee Madaxweynuhu amro.
2) Waxa kale oo uu xafiisku diyaarinayaa warbixin maaliyadeedka sannadlaha ah iyo warbixinaha maaliyadeed ee kale ee loo baahdo, si waafaqsan xeerarka maaliyadda isaga oo u gudbinaya hay'adaha ay khusayso.

**Qodobka 23aad**
**Xeer-nidaamiyayaal**

1) Madaxweynuhu waxa uu soo saarayaa Xeer-nidaamiye aan ka hor imanayn xeerkan oo loo isticmaalayo fulinta qodobbada xeerkan.
2) Garyaqaanka Guud waxa uu soo sari karaa hagayaal (directives) lagu hirgalinayo xeerkan oo aan ka hor imanayn qodobbada xeerkan iyo Xeer-nidaamiyayaasha uu soo saaro Madaxweynuhu.

**Qodobka 24aad**
**Burin/Laalis (Tirtirid)**

**Xeerkani waxa uu jidaynayaa dhammaan amuuraha sharci ee la xidhiidha hawsha shaqo ee xafiiska Garyaqaanka Guud, kuwaas oo aan ka hor imanayn xeerarka dalka iyo Dastuurka Qaranka JSL.**

**Qodobka 25aad**
**Dhaqan-galka xeerka**

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka ay golayaasha xeerdejintu (Guurtida iyo Wakiillada) ay ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL